

# Steps to Finding Childcare for Families

1

## Halkee laga raadsadaa adeegga daryeelka carruurta?

Aaladda farriin xambaarka ee WeCare (app)  
Aaladda farriin xambaarka ee Winnie (app)  
Jiheeyaha Google  
Bogga xidhiidhka Yelp  
Barraha Bulshada



## Fursadaha kabidda dhaqaale (si lagaaga caawiyo, la xidhiidh Ururka adeeg-bixiyeyaasha Daryeelka Carruurta Soomaaliyeed (SCPA) (206) 278-6580 ama u-dir limayl: [support@scpawa.org](mailto:support@scpawa.org))

Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka  
DSHS - 1 (800) 394-4571  
Magaalada Seattle - (206) 386-1050  
Deegaan hoosaadka King County  
(CCFA) - (206) 329-1011  
Bilow Wanaaga Carruurta - Best Starts for Kids  
(BSK) - (206) 263-9105

2

3

## La xidhiidh daryeelka Carruurta



4

## Booqo Daryeelka Carruurta



5

## Codsiga

1. Is-diiwaangelinta Daryeelka Carruurta (DCYF)
2. Heshiiska Daryeelka Carruurta (DCYF)
3. Xafiddaada kaadhka tallaalka (DCYF)
4. Xasaasiyada Cuntada (King County)
5. Oggolaanshaha Daawooyinka (DCYF)
6. Waraqaha/Foomka Oggolaanshaha (DCYF)
7. Heshiiska la-taliyaha caafimaadka (DCYF)



## Bilowga daryeelka carruurta

6



# Steps to Finding Childcare for Families

**Haddii aad u qalanto taageerada dowladda, waxaa jira fursado kala duwan oo kab dhaqaale aad ku heli karto, oo bixinaya kharashyada daryeelka carruurta, kuwaas oo kuu suurtagalinaya in aad awoodo, iyada oo aan loo eegeyn xaaladdaada dhaqaale.**

**Si aad u hubiso, in aad adigu u qalanto taageerada kabka dhaqaale ee daryeelka carruurta, waxaad ka billaabi kartaa, adiga oo la xidhiidha xafiiska arrimaha bulshada ee deegaankaaga ama ilaha dhaqaale ee daryeelka carruurta iyo wakiilka soo gudbinta macaamiisha.**

**Gargaarka dowladdu wuxuu bixiyaa kabka dhaqaale ee daryeelka carruurta, si loo xaqiijiyo in la awoodi karo. La xidhiidh xafiiska arrimaha bulshada ee deegaankaaga ama wakiilka soo gudbinta daryeelka carruurta, si aad u hubiso in aad u qalanto helitaanka adeeggaas.**

## Halkee laga raadsadaa adeegga daryeelka carruurta?

Markaad raadinayso fursaddaha daryeelka carruurta oo la isku halayn karo, qorshaha ku-darso in aad sahmisu illaha kala duwan, si aad u hesho midda ku habboon baahidaada. Ku bilow raadintaada adiga oo hubinaya goobaha iyo aggabyada soo socda:

**Aaladda farriin xambaarka ee WeCare (app):** WeCare waa barnaamij daryeela carruurta oo heegan u ah isku xidhka waalidiinta iyo daryeel-bixiyeyaal la hubiyey xirfaddooda oo ka jira deegaankooda. Iyada oo uu leeyahay isdhexgal ku haboon isticmaalaha iyo hab-raac baadhitaan dhamaystiran, ayaa waxaad ka daalacan kartaa adeeg-bixiyeyaal heerarkoodu kala duwan yahay iyo dib u qiimayn lagu sameeyey oo aad ku gaadhi karto go'aan buuxa oo xog oggaal ah.

**Aaladda farriin xambaarka ee Winnie (app):** Winnie waa aalad (app) kale oo qiima leh oo xambaarsan farriimo oo loogu talagalay in lagu caawiyo waalidiinta si ay u helaan adeegyada daryeelka carruurta oo lagu kalsoon yahay. Laga bilaabo xarumaha xannaano-maalmeedka ilaa dhallaan haynta shakhsiyeed, Winnie waxay soo gubisaa liis dhamaystiran oo ay ku jiraan fikrado waxtar leh oo ay soo bandhigeen waalidiin kale si ay kaaga caawiyaan baadi-goobka aad ku jirto.

**Jiheeyaha Google-ka:** Isku xidh awoodda jiheeyaha Google si aad, si sahlan u oggaato xarumaha daryeelka carruurta ee nawaaxigaaga ku yaalla. Si fudud ugu qor barta raadinta ereyada muhiimka ah oo geli ereyada sida 'daycare' ama 'childcare center', oo sii-baadh fursadaha la khariiradeeyey ee la soo bandhigay ee la socda heerka qiimayntooda, xidhiidhka macluumaadka, iyo jihooyinka lagu daray ee ku haboon.

**Bogga xidhiidhka Yelp:** Isticmaal bogga xidhiidhka Yelp, si aad u hesho dib u eegid faahfaahsan iyo heerarka qiimaynta adeeg-bixiyeyaasha daryeelka carruurta ee deegaankaaga. Haddii aad raadinayso darreen-celin ku saabsan xarumaha xannaano- maalmeedka, dhallaan-illaalinta, ama adeegyada ilmo haynta, bogga Yelp wuxuu kuu soo gudbinayaa aragtiyo qiimad leh oo ay soo bandhigeen macaamiil dhabta ah si ay kaaga caawiyaan samaynta xulasho xog-oggaalnimo.

**Barraha Bulshada:** La soco shabakadaha ugu ballaadhan barraha bulshada, si aad u hesho tallooyinka iyo fikradaha saaxiibada, qoyska, iyo kooxaha waaliddiinta xaafadaha. Aaladaha sida Facebookka, Instagramka, iyo golayaasha waaliddiinta ayaa waxay inta badan yihiin agab-goobeedyo qiimad leh, oo lagu oggaan karo fursadaha daryeelka carruurta ee lagu kalsoonnaan karo, iyada oo loo marayo soo gudbinta shakhsiyeed iyo wada-hadallada bulshada.

Adiga oo ka faa'ideysanaya agab-warreeyadan kala duwan, waxaad sii-wadi kartaa goobidda daryeelkaaga carruurta si hufan, si aad u hesho xalka ugu mudan ee ku haboon baahida qoyskaaga.